



## JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

### Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka

### Hay'adda Xakamaynta Ayaxa lama-degaanka ee Bariga Afrika



## XAYAYSIIN BOOS BANNAAN

Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka waxay ogeysiineysaa Aqoonyahanada Soomaaliyeed in Hay'adda Xakamaynta Ayaxa lama-degaanka ee Bariga Afrika (DLCO-EA) oo ah hay'ad goboleed lugu asaasay Heshiis Caalami ah oo ay saxiixeen Wadamada kala ah: Jabuuti, Eriteeriyaa, Itoobiya, Keenya, Soomaliya, Koonfurta Suudaan, Suudaan, Tansaaniya iyo Yugandha Shaqadeeduna tahay xakamaynta dullinka duula, gaar ahaan Ayaxa lama degaanka (Desert Locust) Shimbiraha isla-guur (Quelea birds) diirdiir (Fall army worm) iyo dukhsi Gindi (Tsets Fly) ee Bariga Afrika ka banaantahay ilaa Sadax Boos waana sida hoos ku faah-faahsan.

Hay'addu waxay ku casumaysaa codsadayaasha inay soo buuxiyaan araaajida codsi booska Agaasime iyo Injineer Diyaaradeed.

Codsaduhu waa inuu ka soo jeedo mid ka mid ah wadamada xubnaha ka ah heshiiska asaasidda Ururka.

### **1.0 Jagada: Agaasime**

- 1.1 **Nooca Shaqo:** Shaqaale Xirfadle ah
- 1.2 **Waqtiga Shaqada:** 3 sano (Hal mar la cusboonaysiin karo)
- 1.3 **Xarunta Shaqada:** **Addis Ababa**, Itoobiya
- 1.4 **Mushaharka iyo Faa'iidooyinka:** Mushahar macno leh iyo xirmo faa'iidooyin ah oo la guddoon siin doono iyadoo saldhig looga dhigayo qaabka mushahar bixinta hay'adda.
- 1.5 **Waajibaadka & Masuuliyadaha:** inuu ka hoos shaqeeyo golaha maamulka ee ka kooban wasiirrada, Agaasimayaasha waxay noqonayaan saraakiisha fulinta u sarraysa ee masuulka ka ah jihataynta siyaasadda guud iyo howlgalinta Hay'adda. **Waajibaadka Agaasimaha** waa inay noqotaa mid gundhigeedu yahay hubinta hoos u-daadajinta shaqooyinka ugu waawayn hay'adda oo ay ka mid tahay:
  - (i) Xuuraanka hawada sare iyo xakamaynta dullinka duula ee la isla gartay.
  - (ii) Barnaamijyada Cilmi-baaridda la hawl galiyay iyo wax-qabadka diiradda saaraya xakamaynta dullinka duula, adeegsiga dullin-dilaha iyo bad-qabka.
  - (iii) Isku-xirka isu-socodka xogaha sare-u-qaadida saadaalinta dullinka duula; iyo
  - (iv) Horumarinta shaqaalaha.

### **Agaasimuhu waa inuu masuul ka noqdo:**

- (b) Gudbinta warbixinnada soo dhaca ee lugu aadinayo dowladaha xubnaha ka ah Ururka iyo Hay'adda Cuntada iyo Beeraha ee Qaramada Midoobay iyo waliba dhinac walba oo rasmi ah oo goluhu u arko inay munaasib tahay in loo gudbiyo xogaha dhamaystiran ee dabeecadda Ayaxa la ma degaannaka iyo dullinyada kale ee hay'addu igmatay, horumarka cilmi-baaridda iyo cabirka heerka xakamaynta gobol;
- (t) Hanashada iskaashi buuxa oo la la yeesho hay'adaha kale ee khusayso iyo agaasimayaasha ee goalaha;
- (j) Aruurinta tabarrucaadka dowladaha xubnaha ka ah hay'adda;
- (x) Gacan ku-haynta koonto xisaabeedyada dhaqaale ee ururka

### **1.6 SHAHAADOYINKA LA ISKA RABO:**

- 1.6.1 Darajada Masterka Beeraha ama wax u soo dhow oo ay bixisay jaamacad aqoonsi haysata. Qofkii haysta PhD ayaa ka sii fiican.
- 1.6.2 Tababarro jaamacadda ka dib ah oo ku saabsan Maamulka Dhaqaalaha / Maaraynta.
- 1.6.3 Waaya-aragnimo shaqo oo aan ka yarayn 10 sano oo heer maamul oo sare ah oo ku saabsan noocyada aqooneed ee la soo sheegay.
- 1.6.4 Waxaa si wayn loo daneenayaa inuu lee yahay awood la soo tijaabiyay dhanka la shaqaynta dad ka soo kala jeeda wadamo kala duwan iyo dhaqanno kala jaan ah.
- 1.6.5 Da'da 40-55 sano

### **2.0 Magaca jagada: Injineer Diyaaradeed / Madaxa Tayada**

- 2.1 **Nooca Shaqada:** Shaqaale Xirfadle ah
- 2.2 **Waqtiga Shaqada:** 3 sano (Hal mar la cusboonaysiin karo)
- 2.3 **Mushaharka iyo Faa'iidooyinka:** Mushahar macno leh iyo xirmo faa'iidooyin ah oo la guddoon siin doono iyadoo saldhig looga dhigayo qaabka mushahar bixinta hay'adda.
- 2.4 **Soo ururinta Waajibaadka & Masuuliyadaha:** Madaxa tayada waa inuu masuul ka noqdaa dabagalka gacan ku-haynta hay'adda ee la ansixiyay, iyadoo loo hogaansamayo shruucda la iskuna xirayo howlaha loo baahanyahay inay ahaadaan kuwo waafaqsan halbeegayadaas.

## 2.5 Shahaadooyinka la rabo ugu yaraan:

- 2.5.1 Rukhsad gacan ku hayn injineernimo (A licensed maintenance engineer).
- 2.5.2 ugu yaraan 5 sano oo waaya aragnimo ah qaybta furfuridda diyaaradaha oo seddex sano oo ka mid ah ay tahay inuu ku soo jiray qaybta tayada;
- 2.5.3. Waa inuu dhamaystay tababarro ku saabsan koorsooyin maaraynta tayada ah khuseeya uu ka qaatay dhinac la aqoonsanyahay.
- 2.5.4 inuu awood la soo tijaabiyay u leeyahay la shaqaynta dad ka soo kala jeeda wadamo kala duwan iyo dhaqanno kala jaan ah waa arrin laf-dhabar u ah shaqada.
- 2.5.5 Da'da 35-55 sano

## 3.0 Magaca jagada: Injineer Diyaaradeed / Madaxa Badqabka

- 3.1 **Nooca Shaqada:** Shaqaale Xirfadle ah
- 3.2 **Waqtiga Shaqada:** 3 sano (Hal mar la cusboonaysiin karo)
- 3.3 **Mushaharka iyo Faa'iidooyinka:** Mushahar macno leh iyo xirmo faa'iidooyin ah oo la guddoon siin doono iyadoo saldhig looga dhigayo qaabka mushahar bixinta hay'adda.
- 3.4 **Soo ururinta Waajibaadka iyo Masuuliyadaha:** Madaxa bad-qabka wuxuu masuul ka yahayhiralinta howlaha iyo gacan ku-haynta hannaan bad-qab oo waxtar leh. Arrimaha laga rabo waxaa ka mid ah inuu madaxa bad-qabku masuul ka yahay horumarinta siyaasad badbaado uu yeesho ururka, inuu ku baahiyo siyaasadda bad-qabidda gudaha hay'adda; dib-u-eegis ku sameeyo siyaasadda bad-qabidda si loo hubiyo inay wali tahay mid shaqayn karta oo munaasib u ah hay'adda; iyo in la xaqiijiyo dhiirrigalinta badqabka hay'adda.

## 3.5 Shahaadooyinka la rabo ugu yaraan:

- 3.5.1 Qof aqoon farsamo u leh gacan ku-haynta Diyaaradaha ama howl galinta duulimaadyada;
- 3.5.2 Ugu yaraan 5 sano oo waaya-aragnimo ah dhanka gacan-ku-haynta diyaaradaha ama hawl-galinta duulimaadyada;
- 3.5.3 Inuu u leeyahay aqoon uu uga soo bixi karo howlaha bad-qabka iyo daba-galka sida uu dhigayo sharci nidaamiyaha;

3.5.4 Waa inuu soo qaatay tababarro koorsooyin ku saabsan hannaanka maaraynta badqabka uu ka qaatay dhinac la aqoonsanyahay;

3.5.5 inuu awood u leeyahay la shaqaynta dad ka soo kala jeeda wadamo kala duwan iyo dhaqanno kala jaan ah waa arrin laf-dhabar u ah shaqada.

3.5.6 Da'da 35-55 sano

**Sida loo codsanayo:**

Si aad u codsatid, booqo mareegtayada [www.dlco-ea.org](http://www.dlco-ea.org) ama la soo dag foomka ay ku hoos qorantahay "News and Events/Vacancies and Announcements". Qofkii daneenaya wuxuu buuxin karaa foomka la tilmaamay isagoo ku lifaaqaya warqadda ajiga (Cover latter), CV faahfaahsan iyo nuqullo ka mid ah shahaadooyinka. Waxaa wakhtiga codsi qaabiliddu ku egyahay 30 bari oo ka 3da luulyo 2020.

Agaasimaha  
DLCO-EA  
P.O. Box 4255  
**Addis Ababa**  
Itoobiya

Email: [Director@dlco-ea.org](mailto:Director@dlco-ea.org)

CC sii:

[basgedom@gmail.com](mailto:basgedom@gmail.com) / [berhane@dlcoea.org](mailto:berhane@dlcoea.org)  
[yonbit@yahoo.com](mailto:yonbit@yahoo.com)

**AMA**

Nuqul caadi ah farta ka saar :

DLCO-EA Registry

Gurd Shola

Wadada CMC – saacadaha shaqada inta lugu jiro (8.00 a.m to 4.30pm)

**Addis-Ababa**

**AMA**

Gacanta uga dhiib:

Wakiilka Xarumeedka DLCO-EA.